AGENTSCHAP
INTEGRATIE &
INBURGERING

COVID-19 | Maatregelen | 27/06/2021

Somali | Vertaald uit het Nederlands

Talaabooyinka 27 Juun

Hordhac

Dawladdu waxay leedahay xeerar si ay fayraska Koronaha u joojiso. Xushmee xeerarka. Haddii aad sidaas yeesho xanuunku kugu dhici maayo qof kalena ku ridi maysid. Bilayska ayaa ku kantarooli kara.

Fiiro gaar ah: Magaalooyinka iyo degmooyinka qaarkood waxay leeyihiin xeerar dheeri ah. Hubi bogga interneetka ee magaaladaada ama degmadaada.

Xeerarka dahabi ah ee xagaaga

- Waxa fiican inaad tallaal qaadato. Markasta oo dad badan la tallaalo, ayaa dhammaanteen amni-geenna u fiican.
- Marar badan gacmahaaga ku dhaq biyo iyo saabuun.
- Ma xanuunsan tahay mise wax calaamado ah ayaad leedahay? Joog guriga oo la xiriir dhakhtarkaaga.
- Adiga oo weli aan is-tallaalin ma aadeysaa meel dad badani joogaan? Is-baar. Waxaad ka iibsaneysaa iskaa-isku-baar farmashiistaha.
- Waxa fiican inaad dadka banaanka kula balanto.
- Waxaa fiican inaad ku balantaan kooxo yar yar.
- Qofkastoo kooxdaada ka mid ah mala talaalay? Markaas uma baahnid inaad xirato maaskarada afka.
- Guriga si fiican u layri: daaqadaha fur.
- Ka fogow wali 1.5 mitir dadka kale ilaa dadka bulshada intooda badan la tallaalayo.
- Sidoo kale ilaali amaankaaga xiliga fasaxa. Ka war-hay xeerarka.

In magaalo kale ama dal kale la aado

Beljamka gudihiisa:

- Si xor ah ayaad ugu dhax safri kartaa.
- Ma isticmaashaa gaadiidka dadweynaha (bas, taraam ama tareen)? Ma ka wayntahay 12 sano? Xiro maaskaro afka. waa waajib.

Dalka dibaddiisa in aad aaddo:

- Waxa fiican inaadan u safrin meel ka baxsan Midowga Yurub
- Ma aadaysaa dalka dibaddiisa? Waxa jira 3 koodho-midabo ah(kleurcodes).
  - Guduud(Rood): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaaddaa ay sarayso. Waxa fiican halkan inaadan u safrin.

  - Liimi(Oranje): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaaddaa dhexdhexaad ay tahay. Halkan waxa fiican in aadan u safrin.
  - Cagaar(Groen): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaaddaa ay hoosayso. Halkan waad u safri kartaa.
  - Ka fiiri bogga internetka https://www.info-coronavirus.be/nl/kleurcodes-per-land/
- Dalka aad aadayso xeerarka ka jira ka fiiri bogga internetka ee diplomatie.belgium.be

Warqadda-cadaynta-COVID-ka (COVID-Certificaat)

- Markaad safreyso, waxaad codsan kartaa warqadda-cadynta-COVID-ka. Tani dalal badan qasab bay ka tahay.
- Waxaa jira saddex nooc oo warqado cadaymo ah
  - Warqadda-cadaynta-tallaalka: waxaad si buuxda u tallaalan tahay ugu yaraan 14 maalmood.
  - Warqadda-cadaynta-baaritaanka: waxaa martay baaritaanka Corona natiijaduna waa mid taban (negatief) (wuxuuna jiraa ugu badnaan 72 saacadood).
  - Warqadda-cadaynta-ka-soo-kabashada: waxaa dhawaan kugu dhacay corona (muddo aan ka badnayn 180 maalmood ka hor)
- Warqadahan-cadaymaha waxaad ka heli kartaa covidsafe.be.
- Bixitaanka ka hor ma inaad baaritaan samaysaa? Ka codso myhealth.be

Markaad ka soo noqoto safarka dibadda

- Ma soo joogtay in ka badan 48 saac dalka dibaddiisa ?
  - Buux-buuxi warqadan (formulier) aad ka helayso https://travel.info-coronavirus.be/nl/public-health-passenger-locator-form inta aanad ku soo laaban Bejamka.
  - Ma waxaad ka timid aag cagaar ah ama liimi ah? Ma'aha qasab inaad isbaarto iyo inaad karantiil gasho midna.
  - Ma waxaad ka timid aag guduud ah oo ka tirsan Midowga Yurub?
    - Ma haysataa Warqadda-cadaynta-tallaalka ama Warqadda-cadaynta-ka-soo-kabashada? Inaad karantiil gasho ama aad isbaarto qasab ma'aha.
    - Ma haysatid Warqadda-cadaynta-tallaalka ama Warqadda-cadaynta-ka-soo-kabashada? Ma haysatid baaritaan koronaha ah oo taban (negatief ah) oo ugu badnaan 72 saacadood jir ah? Isbaar maalinta 1 ama 2 ka dib markaad ka soo laabato safarkaaga. Baaritaankaagu ma yahay mid taban (negatief)? Markaas waad ka bixi kartaa karantiilka marka aad hesho natiijadaada. Carruurta da'doodu ka yar tahay 12 sano ma aha inay baaritaan sameeyaan.
  - Ma waxaad ka timid aag guduud ah oo ka baxsan Midowga Yurub?
    - Ma haysataa Warqadda-cadaynta-tallaalka ama Warqadda-cadaynta-ka-soo-kabashada? Isbaar maalinta 1 ama 2 ka dib markaad ka soo laabato safarkaaga. Baaritaankaagu ma yahay mid taban (negatief)? Markaas waad ka bixi kartaa karantiilka marka aad hesho natiijadaada. Carruurta da'doodu ka yar tahay 12 sano ma'aha inay baaritaan sameeyaan.
    - Ma haysatid Warqadda-cadaynta-tallaalka ama Warqadda-cadaynta-ka-soo-kabashada? Waa inaad karantiil ku jirtaa 10 maalmood. Isbaar maalinta 1 ama 7 ka dib markaad ka soo laabato safarkaaga.

        - Waxaa jira dalal aan tani sidaas u ahayn. Liiskan dalakaas waxaad ka heli kartaa https://www.info-coronavirus.be/nl/kleurcodes-per-land/
    - Ma waxaad ka timid aag khatar-tiisu ay aad u sarayso?
        - Waa inaad karantiil ku jirtaa 10 maalmood. Tan waxaa laga rabaa qof walba.
        - Isbaar maalinta 1 iyo maalinta 7 kadib markaad ka soo laabato safarkaaga.
        - Macluumaad ka guud ee aagaggan waxaa laga heli karaa info-coronavirus.be/nl/hoog-risico-landen/
        - Fadlan ogow: waxaa lagugu ganaaxi karaa 250 euro haddii aadan sidan sameyn.

Shaqo

- Waxa fiican inaad guriga ku shaqayso.
- Shaqadaada ma aadaysaa si aad u soo shaqayso?
    - Xiro maaskaro afka ah
    - Guriga si fiican u layri: daaqadaha fur.
- Su’aalo ma qabtaa? Waxa macluumaad ku siin doona maamulahaaga.

Dukaammada

- Dukaamadu way furan yihiin.
    - Ma gelaysaa dukaanka? Marka hore, jeermiska ka dil gacmahaaga.
    - Xiro maaskaro afka ah. Tani waa qasab.
- Waxaa jira suuq.
    - Waxaad ku booqan kartaa suuqa koox sideed qof ah. Carruurta da'doodu ka yar tahay 12 sano tirada kuma jiraan. Ka fogow 1,5 mitir kooxaha kale.
    - Suuqa wax waad ku cuni kartaa ama ku cabi kartaa.
- Dukaanka habeenkii shaqeeya waxa uu furan yahay ilaa iyo 01:00 saqda dhexe.
- Timajarayaasha iyo xirfadaha kale ee aan caafimaadka xiriir la lahayn way furan yihiin. Tusaale ahaan: daryeelka cagaha iyo qurxinta cidiyaha, goobaha qurxinta gaarka.

Hoteellada, maqaaxiyaha iyo kafateeriyadaha

- Kafateeriyadaha iyo maqaaxiyaha waxay furan yihiin 5:00 subaxnimo ilaa 01:00 saqda dhexe.
    - Waxaad miiska la fariisan kartaa ugu badnaan 8 qof. Ama dadka aad la nooshahay. Carruurta da'doodu ka yar tahay 12 sano tirada kuma jiraan.
    - Waa inaad ku ekaataa fadhiga miiska. Qasab ma aha markaa in aad maaskaro afka ah xirato.
    - Ma ka yara kacaysaa miiska si aad musqusha u aaddo ama lacagta u soo bixiso? Markaa xiro maaskaro afka ah.
    - Waxaad sidoo kale makhaayadaha ku ciyaari kartaa isboorti, sida bilyaard. Balse xiro maaskaro afka ah.

Xiriirka bulshada

- Qof gurigaaga ma ku martiqaadaysaa?

- Waxaad gudaha ku qaabili kartaa 8 qof isla hal waqti.
- Carruurta jirta ilaa iyo 12 sano tirada kuma jiraan.
- Waxaad ku qaabili kartaa jardiinadaada/beertaada dad badan.

Dhaqdhaqaaqa

- Jimicsi ma ku samaysaa naadi ama urur?
  - Waxaa la ogol yahay markaa ugu badnaan kooxo 100 qof.
  - Waxaad la joogaysaa inta ay suurto gal tahay koox sideed qof ka kooban. Ama koox ka kooban dadka aad la nooshahay. Carruurta jirta ilaa iyo 12 sano tirada kuma jiraan. Ka fogow 1,5 mitir kooxaha kale.
  - Ma sameyn kartid waxqabad kooxo 8-qof ah (tusaale ahaan ciyaarta kubadda cagta)? Markaa waxaad sameyn kartaa kooxo waaweyn.
  - Marwalba waa inuu jiraa tababare ama kormeere.

Waqtiyada firaaqada

- Waxaa jira dhacdooyin ama bandhigyo. Tusaale ahaan: tiyaatarka, tartamada isboorti ee xirfadeed ama riwaayadaha.
  - Tani waxaa loo ogol yahay ugu badnaan ilaa iyo 2000 oo qof gudaha ama 2500 oo qof dibadda.
  - Koox sideed qof ka kooban ayaad dhacdo ama bandhig ku booqan kartaa. Ama dadka aad la nooshahay. Carruurta jirta ilaa iyo 12 sano tirada kuma jiraan. Ka fogow 1,5 mitir kooxaha kale.
- Waxqabadyada abaabulan (tusaale ahaan naadi ama urur) waxaa loo oggol yahay ugu badnaan 100 qof.
  - Marwalba waa inuu jiraa tababare ama kormeere.
  - Waxaad la joogaysaa inta ay suurto gal tahay koox sideed qof ka kooban. Ama koox ka kooban dadka aad la nooshahay. Carruurta jirta ilaa iyo 12 sano tirada kuma jiraan. Ka fogow 1,5 mitir kooxaha kale.
  - Ma sameyn kartid waxqabad kooxo 8 qof ah (tusaale ahaan ciyaarta kubadda cagta)? Markaa waxaad sameyn kartaa kooxo waaweyn.
- Maxaa weli xidhan?
  - Diskooteegga
  - Qoob ka ciyaarka

Diinta

- Adeegyada cibaadada waa la ogol yahay.
  - Tan waxaa loo oggol yahay gudaha ugu badnaan 200 qof ama bannaanka ugu badnaan 400 qof.
  - Carruurta jirta ilaa iyo 12 sano iyo adeeggaha cibaadada (tusaale ahaan wadaad ama imaam) tirada kuma jiraan.
  - Waxaad la joogi doontaa kooxo sideed qof ah. Ama dadka aad la nooshahay. Carruurta jirta ilaa iyo 12 sano tirada kuma jiraan.

Xanaanooyinka (Crèches) iyo Iskuulka

- Xanaanooyinka (crèches) way furan yihiin.
- Carruurtu way aadi karaan dugsiga. Dugsigaaga ayaa ku siin doona macluumaad dheeraad ah.

Dhiirigelin

Xeerarkan waxa ay muhiim u yihiin caafimaadka qof kasta. Qofkasta waxa laga rabaa in uu xushmeeyo.

Inaad sidaa yeesho waad ku mahadsantahay. Si wada jir ah ayaan fayraska Corona-ha u joojinaynaa.